

Su'aalaha Badanaa La Iska Waydiiyo EBT-ga Safmarka Daryeelka Ilmaha (P-EBT)

& P-EBT ga Daryeelka Ilmaha ee Xagaaga (** Cusub)

Sanad Dugsiyeedka 2021-2022 (Agoosto 5, 2022)

S1: Waa maxay P-EBT ga Daryeelka Ilmuhu?

J: Waa gunno cunto oo ku meel gaadh ah oo ay ansixisay dawladda federaalka ahi si ay u caawiso qoysaska carruurta ka yar da'da 6 sano inta lagu gudo jiro safmarka COVID-19.

S2: Yaa u qalma gunnooyinka P-EBT ee Daryeelka Ilmaha?

J: Qoysaska Vermont ee hela gunnooyinka 3SquaresVT ee leh carruurta ka yar da'da lix. Gunnooyinka P-EBT ee Daryeelka Ilmaha waxa la siin doonaa bil walba bilawga Sibtambar 2021 illaa Juun 2022 qoysaska u qalma.

S3: Waa intee in le'eg gunnada P-EBT ga Daryeelka Ilmuhu?

J: Gunnada P-EBT ga Daryeelka Ilmuhu waa \$32.31 ilmihii wal Sibtambar 2021 – Janaayo 2022. Xadiga Febraayo – Juun 2022 waa \$33.55 ilmihii bishii.

S4: Waa intee in le'eg gunnada P-EBT ga Daryeelka Ilmaha ee Xagaaga?

J: Isugeynta gunnada P-EBT ga xagaaga ee daryeelka ilmuhu waa \$391 ilmihii. Si ka duwan gunnada Daryeelka Ilmaha ee billaha ah ee joogtada ah, gunnada P-EBT ga Daryeelka Ilmaha ee Xagaagu waa gunno halmar ah oo xaddi sugan ah taas oo daboosha bilaha xagaaga ee Julaay iyo Agoosto labadaba.

S5: Goorma ayaa la bixin doonaa gunnooyinka P-EBT ga Daryeelka Ilmaha?

J: Marka ugu horraysa ee gunnooyinka (Sibtambar 2021 ilaa Janaayo 2022) waxa la bixin doonaa horraanta Juun 2022. Carruurta u qalanta gunnada Daryeelka Ilmaha P-EBT waxay heli doonaan lacagta hal mar Sibtambar ilaa Janaayo bil kasta oo qoysku qaato gunnooyinka 3SquaresVT.

Gunnooyinka Febraayo - Juun 2022 waxaa la bixin doonaa Sibtambar.

Lacagta Daryeelka Ilmaha P-EBT ee Xagaaga waxaa la bixin doonaa Sibtambar ee qoyska u qalma 3SquaresVT Julaay. Qoysaska leh u qalanka 3SquaresVT laga bilaabo Agoosto, gunnada Daryeelka Ilmaha P-EBT ee Xagaaga waxaa la siin doonaa Oktoobar. Taariikhahani waa kuwo is beddeli kara, fadlan markasta ka eeg websaytkan Su'aalaha Badanaa La Is Weydiiyo ee cusub.

S6. Sidee ayaan u ogaanayaa hadii qoyskaygu u qalmo?

J: Waaxda Adeegyada Dhaqaale (ESD) ayaa go'aamin doona in ilmahaagu yahay mid u qalma, iyaga oo ku salaynaya shuruudaha sare. Haddii aad tahay mid u qalma, waxa aad warqad ka heli doontaa ESD taas oo kuu sharxaysa sida iyo goorta aad heli doonto gunnada.

S7: Hadii aanu u qalanno, sidee ayaanu u heleynaa gunnooyinkan?

J: Gunnooyinka P-EBT ga Daryeelka Ilmaha waxa lagu bixiyaa kaadhka EBT kaas oo lagu siiyey qoyskaaga gunnadaada 3SquaresVT.

S8: Ilmahayga waxaa wada koriya laba qoys. Ayaa gunnada heleyaa?

J: Gunnada waxaa loo diri doonaa qofka wayn ee ku qoran Madaxa Qoyska 3SquaresVT oo ay ku qortay ESD.

S9: Maxaan ku iibsanaa karaa gunnadan?

J: Ka eeg [liiska agabyada cuntada ee u qalma](#) websaytka USDA.

S10: Halkee ayaan ku isticmaali karaa kaadhkayga EBT?

J: Waxa aad u isticmaali kartaa inaad kaga iibsato cunto meel kasta oo aqbasha 3SquaresVT. Waxaa taas kamid ah booshariyada, subermaarkeetyada, tukaamada, iyo in badan oo ka mid ah suuqa beeralayda ee Vermont. Macluumaad dheeraad ah ka ogow [websaytka EBTee](#) DCF.

S11: Carruur iigu ma jiraan daryeelka ilmaha. Miyaan heleyaa gunnadan?

J: Haa. Dhammaan carruurta ka yar da'da lix iyo kuwa helaya 3SquaresVT waa ay u qalmaan.

S12: Waxa aan leeyahay carruur kale oo ka weyn da'da lix. Miyey yihiin kuwo u qalma gunnada P-EBT ga daryeelka ilmaha?

J: Maya. Gunnada waxa heli kara oo keliya carruurta helaysa 3SquaresVT isla markaana ka yar da'da lix. Fadlan eeg Su'aalaha Badanaa La Iska Weydiiyo P-EBT ga Dugsiga si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan gunnooyinka ay heli karaan carruurta da'da dugsiga ahi.

S13: Sidee ayay noqonaysaa hadii aanan doonaynin gunnadan?

J: Kaqaybgalku waa ikhtiyaar. Haddii aad doorato inaad ka qaybqaadan, ha isticmaalin gunnooyinka dheeraadka ah ee kusoo dhaca kaadhkaaga EBT 3SquaresVT.

S14: Gunnooyinka P-EBT wakhtigoodu ma dhici doonaa haddii aan la isticmaalin?

J: Haa. Gunnooyinka P-EBT wakhtigoodu waa uu dhici doonaa haddii aan kaadhka lagu adeegsan muddo 274 maalmood gudahood ah.

S15: Waxa aan qabaa su'aalo dheeraad ah. Halkee wax badan ka ogaan karaa?

J: Waxa aad tagtaa <https://dcf.vermont.gov/esd/covid19/P-EBT> ama wac 1-800-479-6151 ikhtiyaarka 7 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.